# HEERKA WASAKHDA XEEBTA CAASIMADDA OO AAD HALIS U AH

QORE: XASAN CISMAN XASAN

Soomaaliya waa wadan ku yaala geeska AFRIKA, waxay ku taalaa Badda Cas iyo Badweynta Hindiya. Waxay Soomaaliya leedahay xeebta ugu dheer ee qaaradda AFRIKA, Sidoo kale waa dal cimilo wanaagsan, ILAAHNA ku galaday kheyraadka dabiiciga ee Bada iyo Berigga.

Soomaaliya waxay soo martay dagaallo sokeeya, taasoo galisay hakad hormarka: Tacliinta, Caafimaadka, wax soo saarka, iyo dhamaan kaabayaasha nolasha.

Magaalada Muqdisho waa Caasimadda Soomaaliya, waa maagaalada ugu bulshada badan, waana magaalada ugu daran uu burburka saameeyay, xeebta magaaladan waa mid uu ka muuqdo saameeynta burburka baaxad weyn.

Dadka Xamar deggan waxay qashinka ku daadiyaan xeebta,

guud ahaan waxay ka dhigen meel ay geeyaan wasakhda ugu halista badan.

Hadaba Soomaaliya marka ay ka soo toostay jiif dheer, waxay ku baraarugtay dhibaatada daran ee ka muuqata Badda Soomaaliya,

waxayna dhidibadda u aasaastay Hey'adda Cilmi Baarista Baddaha Soomaaliya 2013, si loo ogaado Cilmi ahaan:-

Heerka waxyeelooyinka xeebaha Soomaaliya loo geystay mudo ka baddan 25sano iyo sida wax looga qaban karo.

2- Inta uu dhan yahay kheyraadka dabiiciga ee nool iyo midka aan nooleen.

3- Sida ugu haboon ee looga faa'ideysan karo kheyraadka badeenna ku jira & kuwa kale oo badan.

4- Hey'addani waxay sameeysay Cilmibaaris baddan oo kala duwan, waxaa ka mid ah baarista HEERKA WASAKHEYNTA BADDA XAMAR.

Baristaan waxaa lagu sameeyay 4meel oo kala duwan oo ku yaalla Xeebta Magaalada Xamar, waa kuwaan 4tii meel iyo heerka ay

wasakheysan yihiin sida ay baaristu sheegtay:-

1- XEEBTA KAWAAN BARI: Heerka wasakhda goobtaan waa heer sare, waxaa laga baaray (total plat count) waa dhammaan kalan

noolaha ay ishu qaban sida (bacteria, fungi) taasoo aad ku arkeyso, mar kasta oo dhanka xeebta loo sii dhawaado, waxaa kaloo biyaha xeebtan ku yar (DO, pH) oo muhiim u ah noolaha badda hadii ay yaraadaana halis daran u geysan karo nolosha noolaha badda, sidoo kale waxaa xadka laba laab dhaafay (COD,BOD) oo ayaguna saameyn halis ku leh Kalluunka badda.

2- XEEBTA LIIDO: Heerka wasakhda goobtan waa heer ROON, marka laga reebo (DO) oo heerka standardka hoos uga dhacsan.

3- XEEBTA BUUR-FUULE: Heerka wasakhdu waa heer halis ah walxaha Kiimikada ee heerka standardka ka hooseeya ama ka sareeya waxaa ka mid ah (DO,pH,TURBIDITY, & COD), walxahaas oo heerkooda dhaafa ama ka hoos mara waxay wax yeeleen karaan qaab dhismeedka jirka Kalluunka, tarankiisa, jiritaanka cowska badda gunteeda ka baxo.

Sidoo kale goobtan waxaa si xad-dhaaf ah u dagay **(Total coliform)** oo ah nooc bacteria ah, iyo total **Plat count** oo ah noolaha ay ishu qaban Karin (bacteria, fungi, etc) kuwaas oo dadka badda ku dabaasha iyo kuwa Kalluunka isticmaala dhibaato u geysan kara.

4- XEEBTA DEKEDDA: Heerka wasakhda goobtan waa heer sare, walxaha laga helay waxaa ka mid ah: **(Oil & grease,Tss**) kuwaas oo noolaha badda wax yeelo aad u darán dhirta u geeysato sida, taranka Geedaha badda, Kalluunka iyo Shimbiraha badda, quruxda baddana saameyneysa. Sidoo kale (**Total plat count & coliform**) ayaa laga helay goobtan.

Sida daraasadaan **Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliya** ay sameeysay ku cad waxaa halis ku jirta nolasha noolaha badda taas oo dib ugu soo noqon karta dadka, ayna suurta gal tahay in ay halistan gaarto heer aan wax laga qaban karin hadii si deg deg ah aan wax looga qaban.

**Natiijada Cilmibaaristaan wa tan:**

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 2 RESULTS | SITE 3 RESULTS | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 6.13 | 6.16 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | | | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.67 | 5.29 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | 1.7 | 14.8 | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 9.8 | 22.0 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | 7805 | 7640 | 6630 |
| COD | 160 | 64 | 240 | 50 |
| Cd | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 6700 | 260 | 7700 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 7500 | 350 | 8700 | 25 – 250 |
| Total Coliform count; | 110 | 12 | 368 | NIL |

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|
| pH | 8.20 | 8.19 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | No | No | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 4.16 | 6.87 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 8.58 | 6.43 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| COD | 412 | 47.10 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | 164.50 | 20.50 | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | <0.001 | <0.001 | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 230 | 78 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 310 | 120 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 30 | 3 | 245 | 67 | NIL |

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 8.20 | 6.13 | 8.19 | 6.16 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | No | | No | | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.16 | 4.67 | 6.87 | 5.29 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | | 1.7 | | 14.8 | | | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 8.58 | 9.8 | 6.43 | 22.0 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | | 7805 | | 7640 | | | 6630 |
| COD | 160 | 412 | 64 | 47.10 | 240 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | | 164.50 | | 20.50 | | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | | <0.001 | | <0.001 | | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | | <0.01 | | <0.01 | | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37°C; cfu/mL | 6700 | 230 | 260 | 78 | 7700 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22°C; cfu/mL | 7500 | 310 | 350 | 120 | 8700 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 110 | 30 | 12 | 3 | 368 | 245 | 67 | NIL |




GOOBAHA BAARISTA LAGU FULIYAY IYO HEERKA WASAKHDA

# NABADGALYADA BADAHEENNA

ADM.Gaas Prof. Faarax Axmed Cumar (Faarax Qare)

Nabadgalyada: magac cilmiyeed ahaan, waxay culimadu ku qeexaan siyaabo kala duwan laakiin aad isugu dhow, anigu waxaan ka doortay kan ogu gaaban, ugunna koobidda baddan waana kan: Nabadgelyadu waa welwal la'aan, Qofka, qoyska ama qaranku inuu ku jirin welwal sida cabsi, colaad, baahi, caafimaad darro, mustaqbal la'aantu waa nabad la'aan, sidaas owgeed, waxa ka jiro badaheenna welwel ayay nagu hayaan, welina annan loo hayn welwel tir.

Baddeenna waxaan ula jeednaa biyaha kulaalaya xeebaheena oo dhumucdoodu gaarayso xagga Badwaynta hindiya 350N.M(648.2KM);gacanka cadmeedna gaaraysa barkiis (50% = 130km). Baaxaddeeduna (bedkeedu) waxay gaaraysaa 3(sedex) jeer Bedka dhulka J.F.S.

Haddaba waa maxay welwalka ama khataraha ka jira badaheenna?

Khataraha ka jira badaheenna oo suurtagal ka dhigi waayay in ay noqodaan:

- ✓ Kuwa aan leenahay
- ✓ Hoos yimaada qaranimaddenna
- ✓ Noqdana biya leh deegaan nadiif ah oo irmaan, gureeyn abaar iyo aaran toona.

Haddaba khataraha ku wajahan sadexda qodob oo noqon kara istiraatiijiyaddeena badeed oo aan hiigsanayno, waxayna u kala horreeyaan sida ay u kala halis badan yihiin, waana kuwan:

1. Khatar L.1 Xadidda iyo Xaalufinta Badaheenna: Muddo dheer kadib, gaar ahaan burburkii Dowladdii dhexe ee dalka waxa si xowli ah u socotay arrinta ah xadidda Kalluunka iyo xaalufinta badda, waayo maraakiibta kallumaysiga waxay isticmaashaa qalab wax u dhimaya deegaanka dhulka hoose ee badda iyo noolaha ku tarma halkaas,

taasoo keenaysa in ay qaadato ka soo kabsashadeedu muddo dheer, ugu yaraan rubuc qarni (25 sano) sida daraasaddu ay sheegtay (Securing Somali fishers 2015). Qiimaha kalluunka la dhaco sanadkii waxuu gaarayaa $300,000,000 (sedex boqol oo milyan oo doolar), intaan laba jibbaarkeed waxaa lagu qiyaasay khasaaraha xaalufinta, (Securing Somali Fishers 2015), sidaan haddii ay arrintaani ku sii socotana biyaheennu waxay noqon doonaan kuwa guran (la xaalufiyey) ah oo khayraad aan lahayn. Waqtigan la joogo dhowr nooc oo kalluun ah si daran ayay hoos ugu dhaceen, kuwa kalena waaba la waayay, runtii xadidda iyo xaalufinta waa khatar L.1 ee ka jirta badaheenna, unna baahan in la qaado tillaabo lagu yaraynayo khatartaan, haddii latirtiri waayo.

2. Khatarta 2aad waa Wasakhaynta Badda: Arrintani waa mid jirtay laga soo bilaabo 1991kii, in ta aan ka warqabno, warkeeduna aad ayuu u socday sagaashamaadkii, laakiin aad ugama warhayno in ay wali socoto iyo xajmiga ay la egtahay, tani runtii waa khatar aad u halis ah oo saamaynaysa deegaanka iyo nolaha badda iyo kuwa xeebaha oo uu dadku ku jiro, mudda dheer waxaa xeebaha badaheenna ku soo dhacayay, gaar ahaan ka dib Sunaamigii December 2004tii haama badan ayaa xeebta ku soo caariyay, haamankaana wax ku jiro lama yaqaan, dhibka ay gaarsiyeenna deegaan badeedka iyo kalluunka wali war cad kama hayno, in kasta oo Hay'adda Qaramada Midoowday u qaabilsan arimaha deegaanka ee (UNEP) ay sheegatay in cuduro cusub lagu arkay dadka xeebaha deggan.

Haddii hoos loogu daadego khatarahaan waxaa aad halis u ah kuwan:-

- Khatarta L.1, Xaddida iyo Xaalufinta kalluunka
- Khatarta L.8 wasakhayta biyaha badda
- Khatarta L.2 Qorsha la'aanta ku aadan ka hortagidda dhibtaaoyinka (khataraha) ka jira badaheenna.

Hadii la dajiyo qorshe looga hortagi karo khatarahaan waloow haba ahaado hoos u dhigiddeeda 40-50% oo kaliya waxaa la abbaarayaa 2 (labada) khatar ee kala ah:-

a. Xadidda iyo Xaalufinta Badda
b. Sunta iyo haraaga warshadaha ee lagu duugay Badaheenna

3. Khatarta 3aad waa annagoo aad ugu baraarugsanayn, qorsha looga hortago oo waxtar ahna u hayan khatarta L.1 , iyo L.2 oon soo xusnay, xaaladdan waa mid anaan loo hayn jawaab cid qanci karta; In dhib kugu dhaco amba ku haysato cudur waa wax caadi ah, laakiin in aadan xal waxtar ah aadan udoondoonin cudurkaaga, taas ayaa ah wax lala yaabo.

4. Khatarta 4aad oo ah mid dhab ah waa maraakiibta daagaalka ee ajaanibta oo mushaaxeysa Badwaynta Hindiya, agagaarka xeebaha Soomaaliya ayagoo sheeganaya in ay u joogaan la dagaalanka Burcad-badeedka, Dowlado ka mid ah kuwa leh maraakiibta dagaalka ayaa ah kuwa xada kalluunkeena magacyadoodana waxay ku cad yihiin Darasadii (Securing Somali fishers 2015), taas oo caddaynaysa in ay yihiin kuwa ilaaliya, difaacana maraakiibtooda xadaysa kalluunkeenna, waana khatar wayn.

5. Khatarta 5aad oo ah mid dhab ah waa shatiyada beenta ah oy baxshaan dad aanan xil hayn cidna aan masuul u hayn. Bixinta shatiyada lagu kalluumaysto waxaa bixin kara Dowlada dhexe iyo maamul goboleedyada ayadoo la raacaya sharciga kalluumayiga ee L.29 ee 30/11/2014, laakiin lama aqbali karo in lagu bixiyo sifo ka duwan sida sharcigu sheegayo, waxa la ogaaday maraakiib badan oo ku kalluumaysta shatiyo been ah ama muddodoodii ay dhacday,

runtii tani wa akhatar dhab ah sugaysana in laga hortago.

6. Khatarta 6aad ee la xusi karo waa qaar ka mid ah dadkeenna iyo kuwo soo raaca oo ku qaxa badaheenna si sharci darro ah, in badaheenna dad aan dhib noo gaysanayn ku safraan dhib wayn uma arko, laakiin dhibaatadu waa tan ku dhacaysa dalka oo dad kiisu ka qaxaayo iyo dadkaas oo naftooda khatar galinaya, sidaas awgeed ma noqon karto khatar badeed ee waa wax guud.

7. Khatarta 7aad waa waxii la oran jiray BURCADBADEEDDA oo aan hadda jirin, mana jirto sabab ay ku soo noqoto, inkastoo weli ay Reer galbeedku hadal hayaan, waayo maamullo sharci fulin doona ayaa dhashay oo meel ay ka howl galaan ama meel ay wax ku so xirtaan iyo meel (xafiisyo) ay ku gorgortamaan ma heli karaan. Markeedii horana Burcad-Badeeddu halis aad u wayn Soomaliya kuma hayn, haddii laga reebo wadashada magaca Soomaalida, haddaba khatarta L.4 hadda ma jirto.
8. Khatarta 8aad waa badaheenna oo la dhihi karo waxay waddo u noqdeen maan-dooriyaasha, hubka sharci darada ah, ...IWM, qodobkaan naguma ahan khatar wayn, waayo daroogada iyo hubka aan sharciga ahayn waxay qayb ka yihiin ganacsiga caalimiga ah, waxaanna ula mid nahay dhibaatooyinkooda Dowladaha Caalamka, hadaba khatar la sheegi karo ma aha.

Haddii hoos loogu daadego khatarahaan waxaa aad halis u ah kuwan:-

- Khatarta L.1, Xaddida iyo Xaalufinta kalluunka
- Khatarta L.2 wasakhayta biyaha badda
- Khatarta L.3 Qorsha la'aanta ku aadan ka hortagidda dhibtaaoyinka (khataraha) ka jira badaheenna.

Hadii la dajiyo qorshe looga hortagi karo khatarahaan waloow haba ahaado mid hoos u dhigaya 40-50% oo kaliya waxaa haraya 2 (labada) khatar ee kala ah:-

1. Xadidda iyo Xaalufinta Badda
2. Sunta iyo haraaga warshadaha ee lagu duugay Badaheenna

Tallaabooyinka wax ka qabashada halisyadan waxay noqonayaan sidan:-

I. Khatarta 1aad waa tan ah xadidda iyo xaalufinta khayraadka badda waxaa hoos loogu dhigi karaa:-

1. In ay Dowladda Federaalku ay ka codsato Q.M in caalamku gacan ka siiyo Soomaaliya badbaadinta khayraadkeeda Baddeed, waana in Soomaaliya ay ku daadaasho sida Q.M u soo saari lahayd qaraar tilmaamaya in maraakiibta wadda xadidda iyo xaalufinta khayraadka badda soomaaliya loo aqoonsado Burcad kalluumeysi, loona xilsaaro maraakiibta dagaalka ee amniga u joogta biyaha Soomaaliya ee ladagaala B/Badeedka in ay fuliyaan qararkan soona qabtaan maraakiibta kalluumaysiga oon haysan shati sax ah, si loogu maxkamadeeyo maxaakiinta J.F.S.
2. In la howlgaliyo Ciidanka Badda Soomaaliyeed: Dowladda F.S waxaa lagama maar maan ah in ay isku tashato oy nafteeda cuskato. waxaa jira mashaariic fara badan oy wadaan

hay'ado badan oo doonaya in ay xeebaha J.D.S ay dhigaan Raadarro kashifa Burcad-baddeedka, waxay horay ugu taageen Jabbuuti, Yeman, Kenya iyo Tanzania, haddana waxay wadaan in ay ka taagaan xeebaha J.F.S. Raadaar waxba noo soo kordhin maayo ee waa madadaalo, waayo:

a. Dhibaato burcad baddeed ma jirto hadda, markii ay jirtayna halis weyn kuma ahayn Soomaaliya.
b. Ma ogola in ay kashifaan oy sajilaan (diwaan galiyaan) maraakiibta kalluunka naga xadda, waayo kuwa Raadarada wado ayaa kamid ah.
   t. Waxay raadaradaan u shaqeeyaan doowladaha leh maraakiibta dagaal ee ku jitra biyaha J.F.S kuna jooga qaraarada Q.M qaybna ka ah xaddida iyo xaalufinta khayraadka badaheenna sidaan horay usoo xusnay, haddaba mar haday xaaladdu sidaas tahay dhab ahaan, sow taladu ma'aha inaan isku tashanno, waana arrin qasab ka dhigaysa in la howlgaliyo C.Badda. D.F.S,kan Soomaliland,

Kan Puntalnd iyo kuwa laga abaabulo maamul goboleed yada kale.

Sida la ogyahay dhumucda baddeena waxay gaaraysaa(Badwayna Hindiya) 648 km laakiin 50% kalluunku waxuu ku koban yahay biyaha Qaranka, (12.N.M=22km)iyo biyaha xiga (12N.M=22km) wadar; 24N.M=44km hadaba hadii aan wax ka qabano intaan 44km B/hindiya. Waxaan badbaadinay 50% khayraadka baddeena .

Xagga Gacanka cadmeed waxaan ku leenahay 70N.M(130km), hase yeeshee kalluunka intiisa badan 50% waa iska sidii hore aan u soo xusnay: 44km. Haddaba intaan (44km) siday aan u hanan karnaa? oon u badbaadinaa 50% ee khayraadkeena badda, waliba anaggoo kutalagalayna awooddeenna maanta oon cid kale wax kasugayn uguna taashaneyn, waana howlgalinta C.Badda Soomaaliyeed oo dhan sida aan u soo sheegay.

C.Badda Soomaalieed wuxuu ka koobanyahay

a. Ciidmada badda ee D.F.S, kan puntland, kana Soomaaliland dhamaan si fudud ayay u dabooli karaan, awoodda hadda jirta waxay u suurta galaysa in ay wax qabtaan haddii lasiiyo ciidamadaas baddeed xoogaa gacan ah.
b. Ciidamada badda ee maamul goboleedyada oo mid kasta diyaariyo min 100 (Boqol) badmaax (kaluumaysato shaqadooda haysata); waa la tababrayaa waxaana loo sheegayaa in ay ugaarsadaan maraakiibta kalluunka xadaysa kana fogadaan maraakiibta kale nooc kasta ha ahaadaan ee markii la soo qabto markab

tuug ah, waxaa la keenayaa xeebta, maxkamad ayaa la saarayaa, kharashka lagu xukumana waxaa la siinaya 50% ciidanka soo qabtay, si kor loogu qaado holgalkooda, 50% deegaanka ayaa lagu horumarinayaa, Reer galbeedku kama welwali karaan ciidamadaan waayo ma ahan Burcad badeed, mana u aqoonsan karaan, waayo raggaan waa la tababaray halhalna waa loo yaqaan, xeebo ay wax ka keeni karaana ma jiraan mana fulin karaan wax aan ka ahayn waxii loo igmaday.

F.G: Qorshahaan haddii lafuliyo waxuu naga xallin karaa qayb wayn oo ah halista xaddida iyo xaalufinta khayraadka badda, waa sida an rumaysnahaye.

II. Halista wasakhda lagu duugo baddeena: Xalka halistaan waa inuu qayb ka noqdo qorshaha badbaadinta badaheenna, waxana ka mida kuwan;

1. D.F.S waa in ay la xiriirto Hay'adda UNEP ee Q.M u qaabilsan deegaanka, UNEP horay ayay daraasaad uga samysay arrintaan, kaliya waxa hadda aan ka rabno UNEP waa in ay talo ka bixiyaan qaabkii loo aasi lahaa haamankaan badda ka soo dhacay si dhibaatadooda looga samato baxo.
2. Waa in baaris lagu sameeyo biyaha baddeenna, ayadoo la dooranayo dhowr meelood oo kala duwan xagga ka fogaanta xeebta. Howshaani aad uma adka, waxaana fullin karta Hay'adda cilmi Barista Badaha Soomaliya (HCBS) oo lagu taakuleeyo dooman iyo laabab, waana arrin horay dhowr jeer ay u samaysay HCBS.
3. Baaristaan kadib waxii soo baxa, ayagana xal munaasib

ah ayaa loo heli doonaa, ayadoo laga faa'idaysanayo tijaabooyinkii hore ee H.C.B.S, lana kaashanaya UNEP.

4. Waxaa ayadunna aad muhiim u ah in la xakameeyo wasakhda ka timaada berriga sida; Qashinka xeebaha lagu shubo iyo bullaacadaha magaalooyinka ee badda ku socda.
5. In dadwaynaha gaar ahaan xeeblayda, laga wacyi galiyo in ay ka fogaadaan haamaha sunta iyo wasaqada haraadiga warshadaha ee ku soo caariya xeebaha, waayo waxay keeni karaan cudur halis ah.

Ugu danbayntii Haddii qorshahaan la howlgaliyo waxaan hubaa in guul laga gaari karo, hoos udhigidda halista xadidda iyo xaalufinta iyo tan sumaynta Badda. Nuxurka maqaalku waa in aan isku tashanno, adeegsannana imkaaniyaadkeenna cilmi iyo dhaqaale.

# DHIR BADEEDKA YARYAR EE KU NOOL BIYAHA BADDA

(MARINE PHYTOPLANKTON)

Q/R: Mustafe Hassan Nour

Deegaanka Baddu wuxuu hoy u yahay noole fara badan oo ku dhex nool biyaha Badda kana kooban noole ishu arki karto iyo kuwo ilma aragti ah, iskuguna jira labada qaybood ee loo qeybiyo noolaha adduunka; Dhir iyo Xayawaan.

Haddaba maqaalkani wuxuu si koban uga hadlayaa dhir badeedka yaryar ee ishu ayna qaban ee hal unugle u badan loona yaqaano "phytoplankton", waana dhirta ugu badan ee ku nool biyaha badda iyo tan barigaba, waxaanna lagu qiyaasaa inay biyaha badda dhirtani ka tahay in ka badan 80% marka loo eego dhirta kale ee ku dhex nool biyaha badda. Waxayna la mid tahay

dhirta cagaaran ee bariga ee cuntada sameysata oo dhirtan badduna way sameystaa cuntada markey hesho iftiinka qoraxda, nafaqo iyo hawada karboonka (carbon dioxide).

Dhirtan Phytoplanktonku waxay Hawada ku dartaa ogsijiinka (oxygen) in ka badan boqol kii ba kontan (50%), sida ay sheekeen Culimada saynisku, waana hawada an isticmaalno markaan neefsaneyno ([1])


**Maxay tahay dhir badeedkani (Marine Phytoplankton)**

Waa Dhir badeed aad u yaryar oo intooda badan ilma qabati ah (ishu arkeyn) laguna arki karo waynayso (microscope), kuna dhex noolaan kara biyo cusbada leh (dhanaan) iyo kuwo kalaba ( salty & fresh water), waxaana loo yaqaanaa ( phytoplankton) ama dhirta waynaysada lagu arko ( microscopic plant), waxayna u badan tahay hal unugle ( most of them are single celled plants), Waxayna ku noolyihiin lakabka sare ee biyaha badda si ay u helaan iftiinka qoraxda oo muhiim ugu ah dhirtan habka cunto sameysiga sida dhirta cagaaran ee dhulka oo kale, dhirta cuntada sameystana adduunka korkiisa tan badda iyo barigaba nus bay ka tahay dhirtan **phytoplankton**ku.

Dhirtani waxay leedahay midab sameeyaha ( chlorophyll) kaasoo dhirta siiya midabka cagaaran, isaguna wuxuu u dabaa tamarta qoraxda una suurta galiya inay cunto sameysan karto, sidaan ognahay dhirtuna waxay u baahantahy markay sameysaneyso cunto in ay hesho; **Biyo, Tamarta qoraxda, Nafaqo iyo Hawada kaarbooonka** ($CO_2$).

Haddaba dhirtani si ay cunto u sameysato Hawada kaarboonka ($CO_2$) iyo nafaqadaba (nutrients) waxay ka soo nuugta biyaha badda ooy ku dhex milanyihiin, waxayna asaas u tahay habka silsilada cuntada noolaha. Tusaale ahaan waxaaa cuna dhirtan kalluunka yar yar iyo nuucyo ka midaa Nibiriga (whales), ka dibna iyaga waxaa sii cuna kalluunka waa weyn, dadkuna waxay sii cunaan kalluunka waaweyn waa silsilad isku xidhan oo ka soo bilaabanta dhirtan yaryar gaarana Kalluunka waaweyn ilaa Dadka.





## FAA'IIDOOYINKA LAGA HELO DHIR BADEEDKAN YARYAR

- ✓ Dhir badeedkani waxay hawada ka yareysaa kaarboonka($CO_2$) ay soo daayan warshadaha iyo wixi shidaal guba ( burning fossil fuel), sababtoo ah iyadaa qaadata karboonka ugu badan adduunka, sidoo kale waxay ku dartaa ogsijiin(oxygen) fara badan hawada inagu waregsan oo noolaha kale u baahan yahay sida dadka.
- ✓ Waxay ka qayb qaadataa yarenta heerka kuleylka cimilada
- ✓ Waa soo saaraha kowaad ama kan ugu muhiimsan habka shabakada cuntada ee noolaha badda ( aquatic food web)

- ✓ Dhirtani waxay badda dib ugu celisaa nafaqo fara badan oo noolaha kale dib u qaato
- ✓ waxaa laga sameeyaa dawooyin lagu daweeyo xanuuno badan sida; kansarka ( cancer), xanuunada maskaxda, yareynta xanuunka dufanka (cholesterol), wayna dajisaa heerka sokorta jidhka, guud ahaan waxaa lagu taliyaa in la isticmaalo dhirtan si loo ilaaliyo caafimaadka wadnaha iyo beerkaba maxaa yeeley waxaa ku jira vitamino iyo minerals muhiim u ah caafimaadka.
- ✓ Waxaa kale oo laga sameeyaa waxyaaba kale duwan sida nafaqeeyaha beeraha ( Fertilizers),dawooyinka ilkaha lagu cadayo iyo weliba cuntooyinka nafaqeynta dadka loo siiyo ([2])

**SAAMEYNTA ISBEDALKA CIMILADA**

Culimada saynisku waxay sheekeen iney sii yaraaneyso Dhirtan phytoplanktonku ka dib is bedalka cimilada oo saameyn weyn ku yeesha, waxaa dhacda markay biyaha baddu qaboobaan inay biyaha hoose kor yimaadaan iyaga oo wata nafaqadii hoos tagtay, ka dibna waxaa qaata oo nuugta dhirtan yaryar ee (phytoplankton), waxaana loo yaqaana ( **la nino**), laakiin marka dhulku kuleyl noqdo biyaha baddu daganaasho ayey noqdaan ismana rogaan oo biyihii hoos jirey kor ma yimaadaan waana tan sanadkan ka jirtay Soomaaliya ee loo yaqaano ( **El nino**), sidaa darteed dhirtan nafaqadii way weydaa si degdeg ahna way u dhimataa.([3] )

Xigasho

1.http://earthsky.org/earth/how-much-do-oceans-add-to-worlds-oxygen

2.http://surfingsantacruz.com/amazing_health_benefits_of_phytoplankton_from_ocean

3.http://wellnessmama.com/57460/marine-phytoplankton/

# Taariikhdii iyo Waxqabadkii Guddoomiyihii Guddiga Qorista Farta Soomaaliga

**W/Q: C/nuur C/qaadir**



Dr. Shariif Saalax Maxamed Cali

Sanadkii 1972dii xiligii kacaanka oo wadanka maamulkiisii gacanta ku hayay Madax weyne kacaana Mudane: Janaraal Maxamed Siyaad Barre, ayaa waxaa markaas loo magacaabay guddoomiyaha guddiga qorista farta soomaaliga mudane shariif saalax Maxamed Cali, wuxuu ka qeyb galay kulankii 40sano guuradii ka soo wareegatay qorista farta soomaaliga lagu qabtay wadanka jabuuti, munaasibaad ayaa guddoomiyuhu ka war bixiyay heerarkii ay soo martay qorista farta soomaaliga wuxuuna halkaas ka xusay in ay ka soo bilaabatay 1814kii, asagoo intaas raaciyay in ay si rasmi ah u bilaabatay qorista iyo horumarnta farta soomaaliga sanadkii 1920kii.

1960kii waxaa socday nuuca loo qori doono farta in lagu qoro carabi ama laatiin.

Markii xurnimada la qaatay ka dib ayaa 1961dii waxaa dowladii u horeysay arrintaasi u saartay guddi loo xulay sidii ay u qorii lahaayeen farta soomaaliga, guddigaasi waxay ku dhamaadeyn hab is qilaaf ah iyo is qab qabsi ayadoo guddigu mid kasta watay qaab loo qoraayo taasoo layku qilaafay, waxaa markaas dowladdu keensatay khubaro ka socday UNISCO, taasina ma dhicin in laga miro dhaliyo.

Markii ay dhalatay dowladdii kacaanka waxaa ay ku yaboohday in wax yaabaha ay qaban doonto ay ka mid noqonayaa qorista farta soomaaliga sidaa ayaa lagu macaabay Dr. Shariif Saalax Maxmed in uu madax ka noqdo guddoomiyah

guddiga qorista farta soomaaliga, asagoo la hadlaayay guddiga wuxuu xusay in lahjadaha ay yihiin kaabid ama kobcin laakiin af-soomaaligu hal mid oo rasmi ah yahay loogana gudbo lah jadaha, taas si loo gaarana waxaa loo baahan yahay ayuu yiri seddex qodob:-

1- In la helo Far Soomaali Qoran oo cilmi ku dhisan oo wax lagu barto.

2- In qof kasta uu ku dadaalo sidii af-soomaaliga u cilmiyeen lahaa

3- inan ogaano in af- soomaaligu ka weyn yahay hal lahjad taas oo ah in lahjadaha kale ay kaabayaan ama ku darsamayaan afka soomaaliga

Shariif saalax wuxuu ka mid ahaa macalimiin loo diray wadanka talayaaniga 50meeyadii asagoo soo bartay cilmiga luqadaha talayaaniga iyo englishka, markii uu dib u soo noqday wuxuu ka mid noqoday macalimiintii wax ka dhigayay dugsiyadii dalka asgoo kamid noqday barnaamijkiiololha horumarinta reer miyaga ee lagu baahinayay qorista farta soomaaliga ee loogu magacdaray BAR ama BARO, wuxuu kaloo ahaa waziirkii ugu horreeyay ee wazaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Sidoo kale Shariif saalax waxuu ahaa dal mareen danjire ka noqday dalal badan haddana ma aheyn qof dhul shisheeye waligiis jamaday wuxuu aad u jeclaa wadankiisa hooyo, waxaa kaloo lagu xasuustaa inuu ahaa diblamaasi soomaali kii ugu dambeyey oo ku wehliyay madax weyne maxamed siyaad barre shir madaxeedkii uu ka qeyb galo shan biloo ka hor inta aan la ridin dowladdii uu madax weyne ka ahaa shir madaxeedkii 18naad ee ururkka jaamacada carabta oo lagu qabtay magaalada qaahira .

Shariif saalax waxa uu ku dhashay deg. Xudur ee gobolka bakool ugu dambeyn shariif saalax waxa uu ku geeriyooday gurigiisa oo ku yaala Deg. Xamar jajab ee G/ Banaadir waxaana lagu aasay magaalada muqdisho ee ciidiisa hooyo marxuumka waxaan ugu duceynaynaa inuu ILAAHEY ka waraabiyo Janadii Fardowso Aamiin

# KHATARAHA ISBADALKA CIMILADA IYO SIDA LOOMAAREEYNKARO

**W/Q C/laahi Maxamuud Diiriye**

Waxaan maqaalkan si kooban ugu faahfaahineeynaa isbadalka cimilada ee hadal haayntiisu ku badatay caalamka, kadib markii ladareemay saameeynta ow ku yeeshay nolosha dhamaan noolaha ku nool Badda iyo Barrigaba,waxaana sabab teeda lagu sheegaa warshadaha iyo dhamaan waxii guba shidaal oo kudara kaarboon (**C**) hawada,taasina waxay saameyn kuyeelatay cimilada.

## Waamaxay isbadalka cimilada?

Isbadalka cimilada (Climate Change )waa markii isbadal ku yimaada cimila gooreedka (weather) muddo dheer,kadibna ay noqoto mid iska badasha sidi ay awal ahaan jirtay taas oo cimiladu eey noqoto mid kulul,qaboow,huur,dabeeyl,baraf,abaaro,roobab iyo waxii lamid ah, waxaana kadhalan kara khataro kala duwan oo saameynkara nolosha noolaha iyo jiritaanka deegaanka.

Khataraha kadhasho isbadalka cimilda iyo saameyntooda waxaa kamid ah abaaraha, fatahaadaha, sara ukaca heerkulka iyo dabeeylaha Anagoo aaminsan in eeysan intaas ku ekeeyn khataraha sameeynta isbadlka cimilda ayna badantahay saameynta khatarha ka dhasha isbadalka cimilda, waxaan maqalaakan muhiimadda ku saareeynaa saameeynta khataraha isbadlka cimilda oogu ee kadhahaca dalkeena soomaaliya iyo sida loo maareyn kara.

Markaan eegno daraasadii lasameeyay 2013 ee lagu muujiyay qorsha qaran ee laqabsiga isbadalka cimilada dalkeena soomaaliya ooy gacan ka geeysteen hay'ado caalami ah waxaana lagu muujiyay khataraha kajira dalkeena oo ay ogu muhiimsantahay Abaaraha iyo fatahadaah.

## Abaaraha iyo Fathaadaha

Abaaraha iyo Fatahaadaha ayaa ah kuwo saameeyn xoog badan ku leh nolosha iyo jiritaanka deegaanka kuwaas oo geeysta waxyeelo aad ubadan oo ay kamid

yihiin dhimasho naf iyo maalba, waxaana jiro qeeybo ay si ba'an usameeyso ayna kamid yihiin kaabayaasha biyaha,beeraha ,xoolaha iyo daaqsinkooda,xeebaha iyo kheeyraadka badda,caafimaadka iyo noolayaasha kaladuwan(Biodiversity).

Waxyeelaha ay geysan karaan abaaraha iyo fatahaadaha ayaa waxaa kamid ah bur-burinta deegaanka iyo kaabayaasha bulshada ,dhimasho naf iyo maalba leh, hoosudhahca dhaqaalha,nafaqadarri iyo caafimaad daro soo wajahdo haweeynka,caruurta iyo waayeelka .

**Sida loo maareeynkaro isbadalka cimilada iyo khataraha kadhasha.**

Ayadoo aan tixraacayno qorshaha qaran ee laqabsiga isbadalka cimilada ee loo soogaabiyo (NAPA)diiradana ku saareeyno khataraha sameeynta leh ee isbadlka cimilada ee aan kor ku soo xusnay kuna salaysan qeeybkasta saameeynta soo gaarto iyo sida looga gudbi karo waxaan ku soo koobaynaa sidan.

**B). Maareeynta Biyaha**

- In laga dhigo kuwa tayaysan tubooyinka biyaha qaado ee magaaloyinka iyo xeryaha barakacayaasha.
- In kor loo qaado kaydinta biyaha aydoo la isticmaalayo haamo ama barkado tayadooda wanaagsan tahay lalana soconayo nadaafadooda.
- In lasameeyo waax ku shaqa leh biyaha soo saaristooda, utabarida xirfadlayaal soo saari kara biyaha kana shaqeeyn kara daryeelka iyo nadaafadda (water safety) eedeegaanka.
- In la horo mariyo nadaafadda/fiiltareeynta biyaha laguna dadaalo bulshada in eey helaan Adeegyada biyaha lagu daweeyo si bayaha la isticmaalayo ay unoqdaan kuwo nadaafadooda iyo tayadoodo wanaagsan tahay.
- In lagasameeyo wabiyada biyo xireeno si looga hortago in eeysan dhicin waxfatahaad biyo ah.
- 

**T).Beeraha iyo xoolaha**

- In dowlada eey kataageerto beeraleeyda xagga abuurka,tababarda la xirira sida loo beerto.
- In loo sameeyo biyo mareeno (canals) tayo leh si loogu waraabiyo beeraha .
- In beeraleeyda laga caawiyo agabka loo isticmaalo bacariminta beeraha iyo dawooyinkeeda
- Inlasmeeyo gooba lagu keeydiyo dalaga (bakhaaro) oo tayadooda wanaagsan tahay .
- In la horomariyo isku xirka suuqyada beeraleeyda iyo xoola dhaqatada
- In laga hortago xaalufinta dhirta ee laga sameeyo dhuxusha.
- Isku xiraanata hay'adaha deegaanka, xanaanda xoolaha ,maamulka deegaanka iyo oday dhaqameedyada.
- In laga hortago dhoofinta xolaha dhadiga ah.
- In loo diyaariyo goobo ay xolaha daaqaan xiliga ay jiraan abaaraha .
- In laga caawiyo qalabka lagu maamulo xoolaha laguna horumariyo waxsoosaarka xoolaha.
- In lasameeyo iskaashato xoola dhaqato iyo beeraley ka kooban.

**J). Caafimaadka**

- In lahorumariyo goobaha caafmaadka ayadoo muhiimadda gaar ah lasaarayo hooyada iyo dhallaanka.
- In labalaariyo xarumaha nafaqeeynta.
- In la samayo waax digniinta hore ah oo u qaabilsan abaaraha iyo fatahaadaha.
- In lalasocdo lana daweeyo biyaha.
- In lahorumariyo waaxda caafimaadka bulshada gaar ahaan kuwa dagan deegaanka.
- In si haboon loo maareeyo waskhda degaanka.
- In la qaado ololo tallaal oo joogta ah iyo wacyigalin caafimaad.
- In kor looqaado tayada dawada la isticmaalo lana sameeyo isbitaalo waaweeyn oo loogudbiyo bukaanada hoowshooda

aanan meeshaasi waxba looga qaban Karin (referral hospitals).

- In latababaro dhakhaatirta iyo kalkaaliyasha caafimaadka.
- In la horumariy jidadka loomaro gooba caafimaadka ,lana helo gaadiid gaaro goobaha fog fog ee caafimaadka.

**KH). Xeebaha iyo Kheeyraadka badda.**

- In lahorumariyo ka faa'ideeysiga kheeyraadka badda lagana hortago kaluumeeysiga sharci darada ah iyo kushubidda haaraadiga khatarta ku ah noolaha badda .
- In Dowladdu xal u hesho qashinka faraha badan leh ee magaalada ka baxa galaayaana badda, wasakheyn weynna u geysanaya badda.
- In doowladda ay ka taageerto kalumeeysatada qalabka kaluleemsiga iyo kuwa lagu keeydiyo, dhiiri galisanna iskaashatooyinka kaluumeeysatada.
- In laga hortago dhisidda xeebaha iyo bur burinta dhulka xeebta.
- In lahorumariyo beerista geedaha kabaxo xeebaha ee loo yaqaan mangrove .
- In il gaar ah lagu fiiriyo dadka dagan agaagarka xeebaha loona sameeyo hab ay ku maareeynkaraan noloshooda.
- In daraasaad lagu sameeyo goobaha iyo noocayada ay ogu kala badan yihiin noolaha badda.

**D). Noolayaasha kala duwana (biodiversity).**

- Ka hortagidda xaalufinta dhirta ee laga dhigayo dhuxusha laguna wacyigaliyo bulshada hab kale oo ay kusoo saaraan karaan tamar(energy).
- In ladhiso goobo biyo celinayd oo ka hortago rujinta geedaha .
- In laga sameeyo wacyigalin badan saameeynta ka imaaneysa jarista dhirta .
- In la sameeyo siyaasad lagu horumarinayo nolosha duurjoogta loogana hortagayo saameynta khataraha abaaraha iyo fatahaada.
- In ladaraaseeyo waxyaabaha khataraha u

keeni karo wada noolashaha noolayaasha kala duwan iyo sida loo hurumarin karo wada noolashaha hooda

**GABAGABO/GUNAANAD**

Ayadoo aan soo xusanay khataraha sameeynta isbadalka cimilada iyo sida loo maaraynkaro waxaa muhiim ah in aan markale xusno in khatarahaas sida gaar ka ah u taabanaya wadankeena soomaaliya ay yihiin musiibooyin waxyeelo badan leh una baahan in lasameeyo sadex (3) waxyaalo oo lagu maareynkaro

1. In loodiyaar garoobo musiibooyinkaas(Pre-disaster)
2. In laga jawab celiyo hadeey dhacaan (Respond)
3. In lasameeyo dib udajin dadkii ay sameeysay musiibadaas (Rehabilitation).

Qodobadaas waa kuwo muhiim u ah in lagu saleeyo dhibaatoyinka musiibo ee kadhaca wadankeena.

REFERENCES;

National Adaptation Program of Action (NAPA2013)

Diyariyay: C/laahi Maxamuud Diiriye

# GEEDKA ALI-GAROOBKA IYO FAA'IDOO YINKIISA

W/Q MD: HASSAN OSMAN HASSAN ROBLE

Waxuu maqaalkani ka hadlayaa geedka Soomaalidu u taqaano Ali-garoob ama Garanwaa (Prosopis juliflora), wuxuuna ka mid yahay geedaha qalaad ee dalka, si dagdegana ugu fida dhulka isla markaana wuxuu siidaayaa sun taasoo u diida inay ka ag baxaan geedo kale (allopathic) waana sobabta Soomaalidu ugu tiraahdo kaligii noole, kaasoo dhib badana keenay.

Hey'adda Cilmi baarista Badaha Soomaaliyeed (HCBS), Waxay safar aqoon kororsi ah ugu dirtay xubno kamid ah shaqaalaheeda dalka Kenya bishii September 2015, waxaan halkaasi ku soo barteen qaabka ugu haboon ee geedkan looga faa'ideysan karo, Waxayna soo darseen siyaabo kaladuwan oo loo isticmaalo loogana faa'ideysan karo geedkan oo dadkeenu aamin sanyahay in uu dhulkeena dhib ku hayo.

## Sidee geedka cali-garoobku ku soo galay dalka soomaaliya?

Geedkani waxaa la xusaa inuu ka yimid koonfurta ameerika (Latin America) oo loo keenay Soomaaliya si loogu hortago carro guurka.

Geedkani ma cadda xiligii u Soomaliya soo galay laakiin qoraalada qaar ayaa muujinaya (1959) in tijaabo ahaan loogu beeray Sheikh, Gacan libaax iyo lafaruug, waxa kale oo la sheegaa in dalka la keenay (1983) mashruucii dhiraynta baladweyne.

Geedkani waxuu dalka aad ugu fidey shan iyo labaatankii sano (25) ee u danbeysay isagoo soo saara Abuur (seeds) badan oo fudud, taasina waxay u suurto galisay inuu noqodo mid dagdag u faafa,

**Sidee looga faa'ideeysan karaa?**

Mushkilad kasta waxaa ku dhax qarsoon fursad, geedkan cali-garoobka waxuu leeyahay faa'iidooyin fara badan oo bulshada looga faa'ideyn karo, hadaba faa'idooyinkiisa waxaa ka mid ah :-

- **In laga sameeyo dhuxusha (charcoal production)**

Waxay xubnaha Hay'adda cilmi Baarista Baddaha Somalaayeed ee aqoon korosiga u tagay dalka Kenya meelo kala duwan iyo tuulooyinka ku soo booqdeen beeralay Kenyan ah oo ku hawlan ka faa'idaysiga geedka cali garoobka, waxayna soo arkeen beeraley Kenyan ah oo dhul weyn ku abuurtay geedka cali-garoobka sidii beer canba ah(mango) oo kale, waxayna ka dhigaan dhuxul una isticmlaalaan qalabka dhuxusha lagu gubo, waxayna u suuq geeyaan magaalooyinka, halka ay ka gubi jireen markii hore geedaha kale hada waxay u badasheen geedkan waayoo aad ayuu ugu haboon yahay, dhuxul tayo fiican leh ayay kasoo saaraan. Beeralaydan waxay ugu yaraan sanadkii ka faa'iidaan lacag dhan 1900$.



- **<u>Alwaaxda dhismaha (Timber )</u>**

Jeromi oo ah ninki beertay geedkan cali-garoobka aan ku booqanay tuulo ku taala dalka kenya waxaa uu inoo sheegay inuu u abuuro geedkan qaab tayo leh si uu ugu iibsado shirkadaha alwaaxda geedaha ka qorta, si looga dhigo armaajo iyo miisas, ama loogu isticmaalo dhismaha.

- **<u>Calafka xoolaha (Folder )</u>**

Waxaa sidoo kale laga dhigi karaa geedkan calafka xoolaha ayada oo lagu daraayo caws iyo geeda kale, si loo yareeyo dhibta aw ku keeno markay toos u cunaan, taasoo ah inuu dheefshiidka xiro iyo ilkaha oo ka daadiyo sokorta oo ku badan awgeed.


Makiinada lagu shiido cali-garoobka si looga diyaariyo calafka xoolaha




- **Awood koronto (Biomass to generate power)**

Geedka cali-garoobka waxaa laga dhalin karaa awood koronto oo xoog leh, waxaa magaalada Baringo ee dalka Kenya, waxaan ku soo aragnay xarumo loo diyaariyay si koronto looga dhaliyo geedka cali-garoobka, magalada Baringo dhul dhan 30,000 hektaar waxaa hareeyay geedkaan, waxuu qorshuhu yahay in 10 sanadood looga dhigi awood koronto siiso magaaladaas iyo tuulooyinka ku ag dhaw.




- **Malab iyo Xabag**

Geedka cali-garoobka waxuu leeyahay ubaxyo leh bacrim fiican oo u suurta galin karta shinida iney malab tayo leh ka sameyso hadii aad waraabiyo biyo fiican, waayoo inta badan geedkan waxuu ka baxaa dhulka qalalan shinidana biyo ayee u baahan tahay. Sidoo kale xabagta geedka cali-garoobka ku taala waxey ku tayo tahay xabagta geedka la yiraahdo (Gum Arabica) oo ah geed xabagtiisu aad u tayo wanagsan tahay oo inta badan laga dhigo catarada, daawo iyo walxaha la'isku qurxiyo.

Sidaas owgeeda waa laga faa'ideysan karaa geedka Cali-garoobka hadii aan dalkeena ka fulino waay suurta galin kartaa:-

- In maal iyo xoolo farabadan ay noo bad baadaan.
- In ganacsi iyo dhaqaale uu abuurmo.
- Dhul nabaad guuri lahaa inuu badbaado.
- In keynmo geedo kala duwan leh la helo.
- In xooluhu ay tarmaan ayaga oo calaf fiican helayo.
- Roobab fiican oo la helo iyo Cimilo wanaagsan.
- In wabi xiran uu dhicin.
- In bilicda iyo quruxda ay soo laabato.

**xigasho**

7. 7AFROCARE. 1986. c/o American Embassy, Mogadishu, Somalia, USAID, Washington. DC 20523, USA

# Mabda'a sinaanta Aadanaha & dastuurka JFS

Waxaa diyaarisay Dott.Sacdiya sheekh Cumar

Sinaantu waxaa lagu qeexaa in loo sinaado xuquuda iyo waajibaadka.

Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka soomaaliya ayaa ugu sareeyo Nidaamka sharciyeed ee dalka, waxa uu muwaadiniinta Jamhuuriyada Federaalka soomaaliya uu siinayaa xuquuq siyaasadeed,mid dhaqaale, iyo mid bulshadeed,muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha uu sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay in la doorto waxna uu doorto (Qodobka22.F,2)

Dastuurku waxa uu sidoo kale waajibinayaa in muwaadiniinta soomaaliyeed ay u siman yihiin Jinsiyadda, Afkaarta,Midabka,Qabiilka,Diinta, xirfadda curiyaannimo.

Muwaadiniinta oo dhan,iyagoo aan loo eegin lab iyo dheddig,diin,xaalad bulsho ama dhaqaale,afkaar siyaasadeed,qabiil,naafanimo,xirfad,dhalasho iyo afguri toona,xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa.(Qod.11,F1)

Xukuumaddu ma takoori karto qofnaba iyadoo sababab oga dhigaysa da'da,sinjiga,midabka,qabiil,isir,dhaqan lahjad,jinsi,dhalasho,,diin,siyaasad ama fikir,xirfad,mulkiyad, waa in

aan loo arkin fal takoorid ah barnaajmiyadda xukuumadda sida shuruuc, habsiyaasadeed iyo hab maamul ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystay takoorid ama ku sugan xaalad dib u dhacsan.( qod.11,F,3,4)

Cadaaladu, waxay diinta islaamka kaga jirtaa door muhiim ah,Waxaana lagu xusay Quraanka iyo Axaadiista marar badan, in cadaaladu laf-dhabar u tahay jiritaanka bulshada aadanaha. Dastuurka ku meel gaarka ahi waxa uu cadeynayaa xuquuq kasta oo uu qofka muwaadinka u leeyahay xaq,sida in uu helo Nolol,nabadgalyo,caafimaad,waxbarasho,siyaasad,deegaan,hanti,xoriyad,afkaar,shaqo,isusocod degitaan.(Q.Q.13,15).

**Xaqa ka qeeyb galka siyaasadda**

1.“Muwaadin kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeyb qaato arimaha guud ee daweynaha.waxaana kamid ah sidan soosocta:

a) Inuu sameysan karo ama ka mid noqon karo xisbi siyaasadeed, kana qeyb qaadan karo hawshiisa;

b) In xisbi siyaasadeed gudihiisa looga dooran karo jago kasta

2.Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax dooro lana doorto.( Q.22,F.1,2)

**Xaquuda caafimaad sida uu qabo qod.27,F2.**

Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad,cidna lagama hor istaagi karo daryeel caafimad oo deg deg ah sabab kasta,oo ay ka mid tahay awood la,aan dhaqaale.

**Xuquuqda deegaanka sida uu qaboQod.25,F1**

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo deegaan aan waxyeelo u laheyn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyeello halista ah.

**Xuquuqda waxbarasho sida uu qabo Qod.30, F2**

Muwaadiniinta waxey xaq u leeyihiin iney helaan waxbarasho lacag la,aan ah ilaa iyo dugsi sare.

Xuquuqda lahaanshe sida uu qaboQod.26,F1

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho,ku dhaqmo,ku noolaado,iskana gado ama iska wareejiyo markuu doono.

**Xaquuqda xoriyatul qowlka sida uu qabo Qod.18,F1**

Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho,soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono,inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa,xog ama afkaar si kastaba.

**Xuquuda Xirafadda iyo shaqada sida uu qabo Qod. 23**

## Doomaha ka Kalluumeysta Xeebaha Muqdisho iyo haysasha la'aanta Diiwaan-galin sharci ah.

*Qore: Abdirahim Warsame Dirie.*

Waxaa xusid mudan intuusan iman burburkii Dowladdii dhexe 1991 kahor, in uu jirey xafiis qaabilsan Diiwaan galinta iyo ka warhyanta Doomaha kaluumeysiga ah, ee maalin walba ka kaluumeysta xeebaha dalka, Doomahaasoo qaadan jirey bug sharciyeysan oo kasoo baxaWasaaradda G/Baddaiyo Kalluumeysiga, buugaasoo ay kucadyihiindhammaanmacluumaadkaDoonta , waxaakaloosiidheeraaintaas in la diiwaangaliyoShaqaalahaDoontaouguhorreeyoNaakhuudahaiyocidii kale ooDoontakahawlgalaysa,milkiilahaDoontaiyokireystahabaiyaganawaxayka mid yihiinxogtalagaDiiwaangaliyoDoontaKalluumeysiga, hawshaasoodhanwaxaa u xilsaarnaaxafiis u gaar ah ookashaqeeya, kana hortaga wax kastookasoohorjeestaoojabinayasharcigaiyohanaankakaladambeyntalaguhagoDoomahaKalluumeysiga.

BurburkiikadibmaxaaDhacay?

Markii ay Dowladdiidhexemeeshakabaxdeyoouuqalalaasuhudhacay, waxaagabiahaanba la waayeyMaamulkiiiyoSharcigii ay hayseyDowladdiidhexe, taasoo ay sababteyfawdoiyokaladambeynla'aanbaahsan,oodhammaanqaybahanoloshadadkasaameysay, taaswaxaykeentey in shacabkakunoolxeebahadalkeena ay iskasoogattaanDoonyokadibna ay isgakalluumeysitagaanBadda, iyagaooaanmarinwadadiisharcigaa haydee la yaqaanaysidaanhoreyugusooxusnaymadaama ay Dowladdiidhexemeeshakabaxdey, balsewaxaaxuusidmudanmeelahaqaarsidamaamulgoboleedyadadalka Soomaaliyaqaarkamid ah ay kajirteymudogaabankadibburburkiiDowladdiiDhexexogaayarooDiiwaangalinDoomahaKalluumeysiga ahoo ah qaabcanshuurqaadid ah, ooaan la oran Karin way waafajiyeennidaamkiiiyoxeerkiiDiiwaangakintasharciyeysansidauuqabosharcigaKalluumeysiga.

**Sharuucdadalkeenauuleeyahayeedhankakalluumeysiga**.

DalkeenawaxaakajiraSharciiyoxeer-nidaamiyelaguhagayoDoomahakalluumeysigaiyohab-nidaamintooda,sharuucdaaswaxaaka mid ahkuwa:-

1- SharcigaBadahaSoomaaliyeed L.5,26Jenaayo1989).

   QodobadasharcigaanlagagxuseydhankaMaamulkaiyoisdiiwaangalintaDoomahaKalluumeysiga. Qodobka 39aad eesharcigabaddaSoomaaliyeedwuxuuxusayaasidan:-

   F1)-MaraakiibtakuqoranDiiwaanada ay haysowaaxdaBadda, kana soobaxaanShuruudahawaafaqsansharciganiyoxeer-nidaamiyahawaxaa loo ogolaanayaabadmaridda.

   F2)KasokowculeyskaiyomeeshaDiiwaangalintamaraakiibtaiyoDoomaha,waxaalaguaqoonsanayaamagacaDoonyahaiyolambarkadiiwaanka, maraakiibtayaryarkanalambarkoodadiiwaankaookaliya.

   F3)-ShuruudahaiyohababkaDiiwaangalintaeeMaraakiibtawaxaalagugoynayaaxeer-nidaamiyahaqodobadasharcigan.

   F4)-MarkuukeensadoArji , keenanacadeynmuujinaysa in lafuliyeydhammaanshuruudahaiyoqodobadaDiiwaangalinta, Markabkaamadoontawaxayxaqu leeyihiin in ladiiwaan-galiyo, lanasiiyocalankaSoomaaliyeed.

2- SharcigaKalluumeysigaSoomaaliya Lr.29, 30/11/2014, oo wax kabadaleysharcigiikalluumeysigaeesoobaxay Lr.23, 23/11/1985.

QodobadakuxusanxeerkaneedhankaDiiwaangalinta.

Qaybta 3aad Qod/12aad.

FQ/1aad:-

Wasaaradduwaxaysiinaysaashatikalluumeysimaraakiibtaiyod

oomahakakaluumeystaBiyahad alkaSoomaaliya, ayadoo la tixgalinayomaamulGoboleedy adadalka.

FQ/3aad:-Cidnama isticmaalikartoMarkabamaDoon, ookakalluumeysatabiyahaSoomaaliyaisagooaanhaysanShahaadadaRuqsaddadiiwaan-galintamarkabkaooansax ah.

FQ/5aad:Cidkastaooisticmaashamarkabamadoonkalluumeysibiyaha Soomaaliya

Iyadoonhaysanshatidiiwaangashaneemarkabkeeda ,amadoonteedaoo

Ansaxah, wuxuunoqonayaaeedaysane la horgeeyosharcigadalka u yaal

Silooguqaadofal-dembiyeedkauugalay.

Talosoojeedin:-

Hay'addaCilmi-baaristabadahaSoomaaliyeedwaxaymudosanad ah ay kormeeriyoxaqiijinkawadeyxeebahacaasimaddamuqdisho, waxyna u soojeedinaysaahay'adahakushaqadalehsidansoosocota:-

1)DiiwaangalintagaadiidkaKalluumeysigaiyorukhsadsiintakalluumeysatadaSoomaaliyeed, lanawaafajiyoxeerkadalkaarintaasoowax weynkaqabaneysanabadgalyadagaarahaanXilagaaanhadakujirno.

2)Dhaqangalintarukhsadbixintasidawaafaqsansharciga .

3)Dardargalintaxafiisyadashaqadakuleharimahanbadda.

4)-labadawasaaradood (W/G BaddaiyoDekedahaiyo W/Kaluumeysiga )waaineyiskakaashadaanarimahabadda.

5waainlagubilaaboarintaDiiwaangalintaiyoRukhsadsiintaDoomankamashruucahurumarintaxeebahaeedhawaan la aasaasey.

6-waxaanalaqumanin loogafaa'ideystoarimahatababaraddaiyoaqoonkordhintakalluumeysatadaHay'addaCilmbaaristaBadahaSoomaaliyeed.

7-waxaahaboon inloogafaa'ideystoAkadimiyaddaKHaliifMacoweeCuluuntaiyoQawaaniintaBadda (oodhawaan ay hirgalisayHay'addaCilmibaaristaBadahaSoomaaliyeedoowaxbaridiina ay bilowdeydhawaan) baahintatacliintasareeeCuluuntaBadda .

**Dagaalkii 1977-78 iyo Dowrkii C.Badda**

**XASSUUSTII ADM-GAS/PROF. Faara Axmed Cumar(f.qare)**

Waxuu qarxaday dagaalkii 1977-78; waxaa lagu taariikheeyay 4(afar) todobaad 7/7/77; taariikhdan cajiibka ah waxaa shirka saraakiisha ka sheegay ,anniguna aan goob jog u ahaa S/guud Maxamed Cali Samatar, Madaxweeyne kuxigeenkii 1aad, wasiirka gaashaandhigga ahaanna taliyaha X.D.S bishii April nuskeedii danbe ee 1978kii, kadib markii laga soo noqday dagaalkii iyo kadib ka hortaggii inqilaabkii Cirro ee dhicisoobay 9/4/1978kii.

Qiyaastii 10kii luuliyo ayaa la igu magacaabay wakiilka Taliska C.Badda ee saldhigga Berebera, waxaana tagay 2(labo) beri kadib saldhiggaa, anigu markaas waxaan ahaa G/le, Taliyaha saldhiggana waxuu ahaa G/dhexe Inj.Cabdi Eelay oo reer koonfur ahaa ,asalkiisana kasoo jeeday waqooyi, Inj. Cabdi Eelay waxuu ahaa sarkaal soomali ah (waddani), dabeecad qaboow,

masuul ah oon lagu tirinn kacaan iyo kacaan diid toona , arintaan waan isaga ekeyn.

Waxaan gaaray Berbera dhexbartankii bishii luuliyo kadib

hal todobaad qaraxii dagaalkii 77-78; waxaan lashiray Taliyihii Saldhigga G/DH Inj.Cabdi Eelay ,waxaan uga waramay waxa la ii soo magacaabay ,waxaana ku heshiinay in si buuxda hoowsha u wada qabanno. Labadeena horeyba waan isku dhaweeyn dabeecad ahaan iyo istixgalin ahaanba, waxaana isla meel dhignay in markiibta la diyaariyo, isgaarsiinta, qalabka sahanka iyo guud ahaan saldhigga ;hoowshiina waa lagu dhaqaaqay aniguna isha ayaan ku hayay habsami u socodkeeda.

Maalintii 21/7 ,waa kadib hal todobaad imitaankeeygii Berbera, waxaa yimid saldhigga Taliyaha Cusub ee C.Badda G/S Maxamed Cumar Cismaan iyo G/Dh Saciid Mariino (Madaxa waaxda saadka C.Badda) ,durbadiiba waxaan galnay shir ay ka soo qeeyb galeen Madaxdii timid, anniga iyo Taliya Saldhigga .

Taliya C.Badda ayaa furay shirka waxaa uuna yiri: Waxaan wadnaa

amar qoraal ah oy inoo soo dhiibeen madaxdii dalka (Jaalle Siyaad & Jaale Samatar), oo nuxurkiisu yahay "in labada markab ee ah Gantaal xambaarayasha ay Sawaariikh La dhacaan Dekedda Casab(oo ahayd Dekedda ay xabashida wax uga soo dagaan markii ay haysatay Ereteriya) Berri 17.45( waa rubuc saac ka hor maqribka); Dayaaradaha Mig-21 waa in ay garaacaan isla Dekedaas 17;30(rubuc saac ka hor bur-burinta Dekedda ee Sawaariijhda C.Badda)'. Warqaddii uu ku qornaa amarkani waan wada aragnay .

Howl ayaan kala qeeybsanay :Taliyaha Saladhigga waxaa la aadiyay Hubinta Diyaar garoowga Maraakibta ,gaar ahan xagga shidaalka ,xabbadaha madaafiicda (8x30mm) iyo gantaalada lasaarayo maraakiibta (2x4) oo midkasta aad moodid dayaarad aanan baaalal lahayn sida uu u weeyn yahay halka saaruukh.

Aniga xilkeeyga waxuu ahaa diyaarinta dukumintiga howlgalinta sida :Amarka dagaalka ,Hubinta wadadada ay mareeyso maraakiibta sii socod iyo soo socdba oo lagu muujinayo Map ,siidookale diyaarinta shaxda wada hadalka sirta ah (tusaale Garas= waan ka gudbay Ciriiriga Bab-Al-Mandab).

Qorrax= Hawada ma fiicno ;Biriq=Sawaaiirkdii waan ridnay, Diiq= waa nabad qabnaa …...IWM.

Habeenkii 11;00pm ayaan shir kale aan galnay ,waxaana nagu soo biiray labada taliye ee maraakiibta G/le Inj.Mowluud Xassan faarax iyo G/le Ing Axmed xaaji cumar. Waxaa mar kale fasiray Taliyaha C.Badda waajibaadka loo xilsaaray C.Cirka iyo C.badda oo ah in la burburiyo dekedda Casab. Waxaan warbixin lagu bixiyay in wax kasta ay diyaar yihiin ,markaas ayaa lafaray taliyaasha maraakiibta in ay baxaan, hubiyaana wax kasta in ay diyaar yihiin ;waxaana la isla go'aamiyay in labada markab ay ka furtaan marsadooda ka hor qorraxdu inta aysan soo bixin barri 22/7/77 kii.

Marakaas ayaa loo yeeray G/le Sharaf oo shalay la gaarsiiyay qeeybta uu ku leeyahay howl galka casaba;sharaf war baa ka yimid: Halkii cir laga filanayey Ceyryaamo ayaa ka timid,oo waxuu yiri G/le Sharaf: Kama qeeyb gali karo howlgalkaan C.Cirku;waayo Casab waxay inoo

jirtaa 400KM iyo xoogaa.markii laga cabiro hawada (Waddo Toosan) iyo inta (masaafo) ee looga baahan yahay maanyooferka (war wareegga diyaaradda marka ay ku jirto weerarka);wadarata masaafadu waxeey tegeeysaa 500KM, sidaasi owgeed waa in diyaarada MIG-21 ay qaadato shidaal dheeraad ah ,taas oo xannibeeyso Gantaalada ay ku dagaalami lahayd ,Sidaas awgeed C.Cirku kama qeeyb gali karo howlgalkan.

Markaas waa la fasaxay Sharaf ,waxaana la go'aamiyay in C.Baddu kaligiis uu fuliyo waajibaadkan . Waxaa laga wada koontoroolay Map-ka dushiisa waddada maraakibta ee Berbera-Casab-Berbera.

Markaas waxaan soo bandhigay

A.Amarkii dagaalka ee Maraakiibta waana la ogalaaday, nuxurkiisuna sidaan ayuu ahaa.

1.Talyaha guud ee maraakiibta waa G/le Mowlud Xassan Faarax ahana taliyaha gantaal xambaare (GX-1).

2. Ku-xig.G/le Axmed Xaaji Cumar taliyaha (GX-2)

3. Na gula soo xiriira shaxda wadahadalka marka aad dhawaataan ,kanna gudubtaan Baab-Al-Mandab iyo markii aad u baahataan in aad la soo xiriirto taliska guud ee C.Badda (Berbera).

4. C.Cirka waa inuu u diyaar ahaado ka difaacidda maraakiibta xagga hawada illaa Baab-Al-Mandab haddii laga fursan waayo (waana la gaarsiyay amarkaan C.Cirka) ,waana aqbaleen.

F.G Maraakiibtu waxaa ay wadatadaa min 4 madfac 30mm oo automatic ah oo kiiba bixin karo 2000 oo xabbo/daqiiqaddii .(2000x4x2 markab=16,000 xabbo/daqiiqad),Sidaas awgeed way isku filan yihiin xaga difaaca cirka ,laakin waxay iska ahayd dadaal dheeraad ah oo ahaa in C.Cirka la kaashado.

5. wa in aad adeegsataan Map-ka iyo qalabka hagida haddi ay hawadu xumaato oo wax loo jeedi waayo.

6. In lagu rido Dekedda Casab 6(lix) gantaal,labada kalena ay kayd difaac u noqdaan maraakiibta .(labada keydku waa inay noqdaan kuwa GX-1 (markabka taliska).

7. Maraakiibtu waa in ay ka faa'ideeysato Cawcawga iyo

Mugdiga marka ay waajibka fulineyso.

B. waxaana kadib soo bandhigay shaxda wada hadalka oo ayaduna la isla koontoroolay waana la ogolaaday waxaana la I faray:-

1. In aan ku sallimo Taliyaha maraakiibta laba nuqul ee shaxda wada hadalka .

2. Amraka dagaalka waa hal nuqul; afkana uga sheeg inaan la furi Karin bashqadda amarka dagaalka illaa ay ka tallabsadaan maraakiibtu Ciriiriga Bab-Al-Mandab.

Subaxii 22/7/77, saacaddu marka ay ahayd 05:45, waxaan tagnay marsada Maraakiibta GX yaasha ,ayadoo labada markab ciidamadoodu ay ku dul feylsan yihiin, taliyaashiina ay taagan yihiin ;waxaan u dhiibay taliyaha howlgalka dokumeentigii labada ahaa.

Waxaan ku adkeeyay taliyaha duulaanka in uusan furi Karin bashqadda asagoon ka gudbin Ciriiriga Bab-Al-Mandab.

Halkaas ayaan ku sii sagootiyay geesiyaddii u gurmaday difaaca dalkooda ;G/le. Nuur Taqsiin oo (hadda ah taliye kuxigeenka C.Badda 'G/S')oon saaxiib hoose ahayn ahaana Injineerka GX-1 ayaan ku iri “Nuur! Aacasalaama ,ama Berbera ayaan isugu imaan doonnaa ama janaddii Rabbi'.

Nuur Taqsiin, markii aan ka sheekeeysano dagaalkii 77kii waxuu igula kaftamaa aakhiro ayaad noo dirtay ,Ilaah ayaase na soo badbaadiyay.

Maraakiibtii waxaa ay ka furatay marsada ayadoo Qorraxdu darafkeeda sare oo aad u cas uu dhulka ka soo baxayo, aniguna waxaan ku raaxeeysanayey ,anigoo taagan marsada ishana la sii raacayey maraakiibta markeey biyaha dhambaleen oo mid kasta dabada ku sii jiidayo xarriiqin cad (xumada badda), waxaan indhaha iyo qalbigaba aan kala socday maraakiibta illa ay ka mirqaan iyo kadibba, mar waxaa I farax galainayey sida ciidan keennu uu kor ugu sido Sharafta Dalkeena iyo difaaciisa ,marna waxaan ka wel-welaayey sida ay wax noqon doonaan ….. Allow nabad ku soo celi ayaan ku soo gunaanaday deeymooshadeeydii raggaas iyo ducadeeydiiba.

Waxeey nala soo hadaleen galabtii 16:30 ayagoo ku sii shubmaaya Xaga yoolkoodii,waxuuna yiri Taliyihii G/le Mowluud;- Arladu waa wada ceeyryaamo oo wax loo

jeedi karo ma jiraan, meeshuna waxaa ku yaal jaziirado badan (waa galbeedka koonfure ee Ciriiriga Bab-Al-Mandab), waxaan ugu jawaabay anigoo ah sarkaalka howlgalinta: Jaalle isticmaala map-ka ,waxuu ila soo xiriiray hal saac ka dib (17:30)waxuuna igu yiri:- waan ku dhaw nahay goobta weerarka, waxaanana u diyaar garoobeynaa rididda ganataalada ;waxaan ku iri “Iddii Damoy” o af ruusha ku ah “Aad Guriga” oo ahaa baaqa rididda sawaariikhda ,abbaare 18:30 ayuu taliyihii ila soo xiriiray,waxuuna I soo gaarsiiyay in waajibkii ay fuliyeen. Waxaan ugu jawaabay: “LUUG” oo ah “Guul” “sida ku cad shaxda wadahadalka “.Anigoo howlgaliye ahaa, waxaan daqiiqo-daqiiqo ugu gudbinaayay xaaladda duulaanka, Taliyaha G/S Maxamed Cumar oo ku sugnaa barta dhexe ee hogaaminta ee Saldhigga Berbera,halka anigu aan jooga barta isgaarsiinta ee maraakiibta ee dekeddu.

Maraakiibtii waxay ku soo noqdeen Saldhigoodii Berbera ayadoo ragii ay dhibaatooyin kala soo kulmeen badda, inkastoo wax kasta oy ku hilmaamaayeen waajibka ay soo guteen.

Maraakiibtii waan soo dhaweeynay, Taliyaha sare,Aniga, Talyaha Saldhigga iyo Saraakiisha kale dhamaan waan gacan qaadnay, waxaana isugu hambalyeeynay guusha C.Badda uu dalka u soo hooyey.

Habeenkii 08;00pm ayaa radio Holand sheegay in dekedda Casab gantaalo lagu duqeeyay, ogu yaraana hal gantaal uu haleelay meel halis ahayd.

Taliyihii C.Badda iyo Saciid Mariino (madaxii sadaka C.Badda) muqdisho ayey ku laabteen, aniguna halkaa waxan uga dambeeyay bil kale.

Waxaa layaab aheeyd in doowladdii soomaaliya ay si rasmi ah u caddeeysay isla habeenkii duullaanka C.Badda ee Dekeda Casab 22/7/77: In X.D.S ay galayaan dagaalka, muddadii labada todobaad ahayd(7/7-21/7, Soomaaliya waxay ku andocooneeysay in Jabhadihii xoreeynta Soomli galbeed ay dagaalamayaan.

HIIGSIGA CUSUB EE SOOMALIYA (NEW DEAL FOR SOMALIA)

Mustafe Hassan Nour

Hiigsiga cusub waa qorshe wax qabad oo Dowladi ay dajisato si loo hormariyo loona gaaro ahdaafta ay qorotay ama dagisatay markaa. Haddaba hiigsiga cusub markii ugu horeysay waxaa isticmaalay dalka mareykanka xiligii madaxweynihii Franklin D. Roosevelt (1933 to 1945) oo isagu hindisay hiigsiga cusub, si dadka mareykanka loogu baraarujiyo shaqada iyo haruumarka waqtikaas oo ay haystay dhaqaale xumi ([1]).

Intaa wixii ka danbeeyey, hiigsiga cusub waxaa adeegsada wadamada deeqaha bixiya si ay ugu taageeraan wadamada Nugul ama saboolka ah, Wadamada deeq bixiyayaasha ayaa shirkii ugu danbeeyey ee ku saabsan hiigsiga cusub ku qabtay magaalada Busan ee Koonfur kuuriya 2011ki oo ay ka soo qayb galeen in kabadan 40 Dal iyo

Ururo, waxaana lagu go'aamiyey in kor loogu qaado waxtarka kaalmada la siiyo dalalka nugul. Haddaba barnaamijka hiigsiga cusub ayaa ah mid dalalka nugul ee dagaalada ka soo baxaya lagu siiyo dhaqaale toos ah sida Soomaaliya

Hiigsiga cusub 2016 ee Soomaaliya

Barnaamijkan hiigsiga cusub ayaa ka bilawdey Soomaaliya 2013, bishii sagaalaad, Shirweyne qaran oo lagu qabtay muqdisho ayna ka soo qeyb galeen maamul goboleedyada, dhamaan bulshada qeyba heega kala duwan, qurba joogta, iyo wakiilo ka socdey beesha caalamka, waxaana ugu muhiim saneyd in indhaha beesha caalamka lagu soo jeediyo Soomaaliya iyo in la helo lacag lagu maareeyo dib u dhiska Dalka. in laga soo saaro qorshe cad oo Dowladdu ku shaqeynayso mudada ka horeysa 2016 inay fuliso loogana saaro dhibaatooyinkii 25 sano ee u danbeeyey haystay dalka iyo in la sameeyo nidaam Dowlada Federaalka iyo Beesha caalamku ku wada shaqeyn karaan si Dowladuna u hesho koolmo toos ah, looguna fuliyo waxyaabaha ay

hiigsanayso inay gaarto mudada loo igmadey xilka inay hayso.

Hiigsiga cusub ee soomaliya wuxuu yimid markii laga baxay ku meel gaadhkii oo waxa isbadalay qaabkii ay Beesha caalamku u caawin jirtay Soomaaliya oo imika dowlada ayaa qoranaysa waxa ugu muhiimsan ee laga caawinaayo qaabkaana waxaa loo baxshay Hiigsiga cusub 2016 ee Soomaaliya. Si kastaba ahaate, shirkan oo looga hadlaayey geedi socodka siyaasada ee dowlada fedaralka, ayadoo la tiigsanaayo 2016ka inay dalka ka dhacdo doorasho xor iyo cadaalad ah.

Soomaaliya iyo beesha caalamka

2013, bishii sagaalada, shirwayne ayaa lagu Qabtay magaalada Brusseles ee dalka Bilgim, kaasoo ay ka qayb galeen in ka badan 50 dal iyo Hey'addo iyo Ururo Caalami ah oo daneeya arrimaha Soomaaliya, waxaana shirkaa loogu magac darey Higsiga cusub ee Soomaaliya.

Waxaa looga hadlay sidii Soomaaliya looga caawin lahaa haruumarinta qorshihii ka soo baxay shirkii muqdisho ee ku saleysnaa hiigsiga cusub 2016, waxaana loogu yaboohay Soomaaliya lacag dhan 2.4 $ bn, hase ahaate, lacagtaasi bilow yar ka dib Dowlada Soomaaliya waxay sheegtay inay waxba ka soo gaarin, haddana waxaa dhacay shirkii labaad ee dib u eegista hiigsiga cusub ee soomaliya oo ka qabsoomey Copenhagen, Denmark 2014kii .

Barnaamijga hiigsiga cusub si loo fuliyo dowalada Soomaaliya waxay sameeysay dadaalo badan, waxaana xaqiiqo ah in ay dowladdani wax badan ka qabatay arrimihii hiigsiga cusub oo ay dhistay maamulo gobaleedyo qaar ka mid ah lana dhisey Hey'addo dowli ah sida gudiga doorashoooyinka kan xudduudaha, laakiin way u suurto gali waydey inay dalka ka gaarsiiso doorasho hal qof iyo hal cod ah oo ay balan qaatay markii hore kana mid ahaa qorshaha hiigsiga cusub 2016.

Madasha wada tashiga iyo Hiigsiga cusub 2016

Waxaa la sameeyey madasha wada tashiga oo ka kooban Dowlada dhexe iyo Maamul goboleedyada si loo dardar galiyo howlaha Hiigsiga cusub, waxaana

la qabtay shirar badan oo looga tashanaayey qaabka doorasho ee dhici kara, waxaana lagu soo darey in la sameyo aqalka sare ee Baarlamaanka oo ka kooban 54 qof, waxaase lagu hashiin waayey habka loo soo dooranayo, ayadoo maamulada qaar qabeen hab deegaan in lagu soo xulo Baarlamaanka, haddaba shirar iyo wadatashiya dheer Dowlada federalku waxay soo saartay in aqalka hoose ee Baarlamaanka lagu soo xulo qaabkii hore 4.5 halka kan sarana maamulgoboleedyadu ay soo xulayaan in kasta oo ay diidey Puntland. Si kastaba ha ahaatee, wali ma cada sida ay beeluhu u soo dooranayaan Aqalka hoose iyo sida ay maamul goboleedyadu ugu qaybinayaan beelaha daga dhulka ay maamulaan, waxaana dhawaan lafilayaa in lagu faafaahin doono shir loo balansanyahay inuu ka dhaco dalka Turkey. Waxaanan rajeynaynaa inuu ka soo baxo wax umada u dan ah.

Xigasho

1. http://www.biography.com/people/franklin-d-roosevelt-9463381

**TAARIIKHDA BANUUKTA SOOMAALIYA 1920-2012**

W/Q: Dott. Axmed-Bashir Maxamed Cali

Dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya bangi laga furay waxaa ugu horeysay 15 November, 1920kii oo la furay bangi la oran jiray Banca De Italia oo la furay laantiisii Muqdisho.

1938dii-na banca Di Napuli ayaa laga furay Magaalada Muqdisho laan, kadibna laan kale ayaa lagu furay kismaayo. Banca Di Napuli waxaa lagu badalay kabacdi Cassa Di Risparmio Di Tornino kaasi oo xafiis ka furtay magaalada Muqdisho 1932dii.

1952dii Bangiga Qaranka India (National Bank of India) kaasoo kabacdi isu badalay Grindlay Bank oo loo baxshay National and Grindlay Bank ayaa laamo ka furtay Berbera iyo Hargaisa dhulkii British Somaliland. Bangi India MBI wuxuu ahaa kii ugu horeeyaya oo laga furo dhulkii Somaalida ahaa ee Ingiriisku gumeysan jiray. Wuxuuna ahaa Bangigii Dowladdii gumeysiga Ingiriiska ilaa British Somaliland ay ku biirto dhulkii Talyaaniga gumeysan jiray 1960kii isku-darkii kadib. MBI iyo Grendlays waxey ka furteen laan Muqdisho.

Kahor 1958dii, Banco Di Roma wuxuu laamo ka furtay Muqdisho iyo Merca, labadaas iyo Banco Di Napuli waxey laamo ku lahaayeen Ethopia iyo Eretereeya.

July 1, 1960-kii waxaa dhashay Jamhuuriyaddii cusbayd ee Soomaaliya, waxeyna abuurtay Bangiga qaranka Soomaaliyeed (Somali National Bank), si ay ula wareegto howlihiiay hayeen Banca De Italia (Cassa per La circulazione Monetaria Della Somali iyo Muqdisho Branch ee Banca De Italia.

Bangiaas cusub ee Bangiga Qaranka Soomaaliyeed ah wuxuu

isku watey oo mideenayey howlihii Bangiga dhexe ee Soomaaliya iyo howlihii bangiga ganacsiga Soomaaliyeed ay wada qabanayeen.

1968-dii, Dowladdii Soomaaliyeed waxey abuurtay Banki deyn iyo maalgelin bixiya oo lagu magacaabo Gredito Somalo (Somali Gredit Bank), kaasoo maamulkii Talyaaniga ay sameeyeen 1954-tii.

1971-dii, Dowladdii kacaanka ee uu hogaaminayey General Maxamed Siyaad Barre waxey qarameesay oo ay la wareegtay afar banki oo ajnabi ah oo kala ah Banco Di Roma, Banco di Napoli, National and Grindlay Bank iyo Banque de Port Said). Isku darkoodana waxaa laga sameeyay Bangiga ganacsiga Soomaaliyeed. Waxaa kaloo Dowladdu sameeysay (abuurtey) bangiga keedinta iyo ganacsiga kaasoo la wareegay laamihii ay lahaayeen Bunuuktii lala wareegay. Bangiga Qaranka soomaaliyeed waxaa loo bedelay oo lagu magacaabay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya. Bangiga ganacsiga iyo keedinta wuxuu laamo ku lahaa magaalooyinka Baydhabo, Beledweyne, Berbera Boosaaso, burco Gaalkacyo, Qardo, Hargeisa, Kismaayo, Boorama, Gibiley iyo Dijabuti.

Febreury 8 1975-tii, dowladda Soomaaliyeed howlihii Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxey ku magacawday Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, waxa kale oo magaca loo bedelay Bangigii la dhihi jiray Somali Savings and Credit Bank waxaana lagu bedelay bangigii ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed oo qaabilsan keedinta, maalgelinta, iyo IWM……..

Haddaba, shaqada Bangiga Dhexe maxay ahayd?

Shaqada Bangiga Dhexe waxey ahayd:

1. Soo saarista lacagta Shilinka ee soomaaliya, iyadoo Decretto ka heleysa madaxtooyada soomaaliya.
2. Kontoroolidda iyo la xisaabtanka Bangiyada kale, si aan lacagaha shacabka iyo qaranka u dhumin.
3. In hantida ganacsiga iyo Bangiyada kale kala bar ay taalo bangiga dhexe si haday kacaan bangiga dhexe u kabo
4. Goonta is bedelka sarifka lacaga soomaalida iyo lacaha kale (inkastoo hadda suuqu uu jaangooyo).
5. Sameynta gadista lacagta shisheeye (Auction).

Labadaas bangi (Bangiga ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed) waxey howlgalayeen ilaa laga soo gaaro bur-burkii 1991-=kii, inkastoo shaqadoodu ay sanadihii dambe gabaabsi ahayd.

December, 2006-dii Dowladdii Federaalka ee Soomaaliya oo madax uu ka ahaa C/llaahi Yuusuf Axmed, ayaa waxey furtey Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waxeyna ku furay Dicretto sharci **No.6** oo soo baxday 18-kii October 1968 la tixraacayo.

Waxaa kaloo Bangiyo Dhexe furtay Puntland iyo Somaliland, waloo shaqada seddaxdooduba ay ku kooban tahay keedin marka laga reebo Bangiga Somaliland oo lacag Somaliland Shilin sameeya.

MAGACYADA LOO AQOON JIRAY DALKA SOOMAALIYA

Adm.Gaas Faarax Axmed Cumar (F.qare)

Qofkasta waxuu xaq u leeyhaya in uu si xor ah u doorto xirfadda,shaqada ama mihnadda uu rabo.

**Xaquuqda isu socodka iyo degenaashaha sida uu qabo Qod.21,F1).**

Qof kasta oo si sharci ah ku deggan dhulka jamhuuriyadda wuxuu xaq u leeyahay in uu sixor ah u dagi karo,ugu dhex socon karo meel kasta oo dalka ka mid ah,kana bixi karo.

Xigasho Dastuurka KMG ah

soomaaliya waa magacii ugu dambeeyey ee Dalkeenna, horena waxaan ku soo qorney 4( afartii ) Majalladood ee iska soo dabo baxeysay sanadkii 2015, waxayna kala ahaayeen ayadoo la soo koobayo:-

1. **PUNT**: magacaan wuxuu ka yimid xagga Masar, wuxuuna socdey (Q.27-CH-Q 4 CH), waa markii Giriigu qabsaday Masar, eeg majallada Julla-Jawaay; L. 1/2015, bog 59/2015.
2. **FUNT** (ama phunt): magacaan wuxuu ka yimid Yahuudda oo xiriir ganacsi la lahayd Dalak Soomaaliya, gaar ahaan, waqtigii Nabi Suleymaan Q. 10 CH. wuxuuna socday Q.Q.10-12 CH. ( eeg majallada Juula-Jawaay: Bog. 59-60 L.1/2015.
3. **KUUSH**: waa magac xiriir la leh MEDEBKA, Asalkiisuna wuxuu ka yimid Koonfurta Masar Waqooyiga Suudaan oo mar ay xukumeen Masar dadyooga Dega halkaasi mudo aad u badanna ma socon eeg majallada Juula-Juwaay L. 1/2015.
4. Magaca afraad waa **ETHIOPIA**, wuxuu socday Q.5 CH –Q. 15 CD. Magacu waa Giriig; wuxuuna aad ugu caan

baxay Dalalka Geeska Africa eeg (Maj.J.Jawaay, L. 2/2015,Bog. 18-19), waana magac medeb madow tilmaamaya

5. Magaca Shanaad waa **AL-XABASHA** ( Abisiniya), wuxuuna ka soo jeedaa Jariirada Carabta, wuxuuna 100% la macna yahay Magaca Ethiopia (ee Maj. J. Juwaay, L.2, 2015, Boq. 19-21; waa magac medeb (madow)tilmaamaya.
6. Magacaa lixaad waa Dalkii **MACAAFIR** , asalku waa Yeman ( Q.5. CH – 6 CD) ( eeg Maj. J. Jawaay, L.3/2015, Bog.32-34.
7. Magacaa Todobaad waa **AZANIA** (Azaaniya), wuxuuna ka yimid xagga Giriigii xukumaayey Masar Q.4-1 C.H. Faaladiisa ka eeg ( Maj.J.Jawaay, L.3/2015, Bog.34-38, (waliba aad u akhri maqaalkaa).
8. Magaca Siddeedaad waa **ZINJI**, kanina wuxuu nooga yimid xagga Faaris (Iiraan) wuxuuna socday muddadii u dhexeysay Q.3. C.H -13 CD. Faahfaahinta ka eeg ( Maj.J.Jawaay, L.4/2015, Bog. 32-34), waa medeb madow
9. Maggaca Sagaalaad waa **BARBAR** oo ka yimid xagga Roomaanka ka dib markii ay qabsadeen Masar Q.1aad ee CD. Wuxuuna socdey Q.1-13 CD, Magaacaan iyo Xabashi, Zinji, Barbar si isku mid ah ayaa loo isticmaali jirey, ayadoo qolo kastaaba ay mid ama labo ay adeegsanayeen, eeg (Maj.J.Jawaay. L.4/2015,Bog 34-35, asaguna medeb ayuu tilmaamayaa
10. Magaca tobnaad waa Soomaali: Soomaaliya, magac ahaan, wuxuu soo baxay oo adduunyadu ay maqashay, sajishana, horraantii Qarnigii 14aad ee miilaadiga ([1]).

Culimada Taariikhda baartaa waxay kala qabaan aragti kala duwan ee macnaha magaca Soomaaliya, waxaana aad u soo uruuriney MD. Anwar Axmed Mayow ([2]), waxaa ugu xoog badan cilmi ahaan uguna saxnimo badan in magacaan uu ka soo jeedo odey Samaale sida ay qabaan Taariikh yahanada, gaar ahaan, kuwa

Soomaalida uu ugu dambeeyey Md. Anwar Mayow naftiisa ([3])

Oday Samaale ( Allaha u naxariistee ) waxaa ku abtirsada si toos ah ( xag oday) iyo dadbanba ( xag habar) shacabka soomaali intiisa badan ( qiyaas ahaan 90 % ); culumada qaargoodna waxayba ku adkeysanayaan in Soomaali uu wada dhalay 90 % ka ([4])aan soo xusney; inta kale ee Soomaali ku nool waa Banaadiri iyo Banti oo soomali cidna aysan ka aheyn.

Haddaba magacii oday Samaale ayaa noqdey magacii Dalka.

Laga soo billaabo dagaalkii Axmed guray (Q. 16. CD). Maraajicda juquraafiga iyo taariikhda, magaca Soomaali ayaa ku shaacsanaa, wuxuuna aad u ku soo shaac baxay magaca Soomaali wixii ka dambeeyey isticmaarkii (Q.19-20), wuxuuna noqday mid rasmi ah markii Soomaaliya noqotay xor, kuna biirtay Q.M sidaana magacu ku yahay mid Caalami ah.

Halkaan waxaan ku soo gunaanadeyna maqaalladii ahaa magacyadii loo aqoon jiray Dalka Soomaaliya

**Xigasho**


1. Eeg kitaabka Anwar ee Qabaa'ilka Soomaalida, Rairobi- Kenya 2014 (carbeed). Bog 13
2. Eeg kitaabka Anwar ee Qabaa'ilka Soomaalida, Rairobi- Kenya 2014 (carbeed). Bog 13
3. Eeg M.1.liiqliiqato Dalka Punt
4. Luwis : Soomaalia , gaar ahaan Cut. Aad.